# Talaallada cunugaaga

# Xog loogu talagalay waalidiinta iyo masuuliyiinta yimid Ireland kana yimid wadamada kale

Waraaqdaan waxaad ka helaysaa xog ku saabsan talaallada cunugaaga. Talaallada ayaa ilaaliya caafimaadka cunugaaga ayagoo ka difaacaaya cudurada caabuqa ee laga hortagi karo. Adeegga Caafimaadka ee Ireland (Maamulka Adeegga Caafimaadka) ayaa diyaarinaaya kooxaha talaalka si ay talaallada ugu baxshaan rugaha caafimaadka. Dadka qaar waxaa talaallada siin doona kooxaha talaalka ee wareegga. Xubin kamid ah kooxda talaalka dhamaystirka ah ayaa kula soo xiriiri doona si uu kaagala hadlo talaalka cunugaaga.

**Maxay talaalladu muhiim u yihiin?**

Talaalladu waxay ilmaha iyo carruurta ka difaacaan caabuqyada xanuunka daran ku ridi kara. Ilmaha aadka u yaryar ayaa khatar ugu badan ugu jira caabuqyadaan, marka talaallada ayaa la bilaabaa xiliga ugu horeeya ee suuragalka ah.

Gudaha Ireland jadwalka talaalka ayaa ka biloowda da'da 2 bilood jir talaallada lagu talinaayana waxaa ilmaha la siiyaa ilaa 5 booqasho oo aad ugu tagayso dhakhtarka qoyskaaga (kaasoo loo yaqaano Dhakhtarka Guud ama GP) marka ilmahaagu jiro 2, 4, 6, 12, iyo 13 bilood. Talaallada la siiyo ilmaha Ireland ayaa ka difaaca caabuqyada badanaa dadka ku dhaca ama aadka u daran ee ka jira Ireland.

| | | |
|---|---|---|
| 2 bilood | Booqashada 1 | 6 talaa oo ku wada jira 1 + PCV + MenB + Rotavirus<br>3 Cirbadood + Dhibco afka laga Siinaayo |
| 4 bilood | Booqashada 2 | 6 talaa oo ku wada jira 1 + MenB + Rotavirus<br>2 Cirbadood + Dhibco afka laga Siinaayo |
| 6 bilood | Booqashada 3 | 6 talaa oo ku wada jira 1 + PCV + MenC<br>3 Cirbadood |
| 12 bilood | Booqashada 4 | MMR + MenB<br>2 Cirbadood |
| 13 bilood | Booqashada 5 | Hib/MenC + PCV<br>2 Cirbadood |

**Waa kuwee talaallada lagu talinaayo gudaha Ireland?**

Carruurta waxaa lagu talinayaa in la siiyo talaallada si looga difaaco caabuqyada ka jira Ireland kuwaasoo ku badan Ireland kuna ridi kara xanuunka daran.

**Waa maxay farqiyada u dhexeeya talaallada lagu baxsho wadamada kale iyo talaallada lagu baxsho Ireland?**

Qaar badan oo kamid ah talaallada lagu qaato Ireland ayaa sidoo kale lagu baxshaa wadamada kale. Tusaale, talaallada ka hortaga Gawracatada, Booliyada, Teetanadaha iyo Jadeecada ayaa la siiyaa carruurta inta badan wadamada.

Waxaa jiri kara farqiyo u dhexeeya qaar kamid ah talaallada lagu talinaayo gudaha Ireland marka loo eego wadamada kale. Tan waxaa sabab u ah inay jiri karaan farqiyo u dhexeeya cudurada ku badan Ireland marka loo eego wadamada kale. Tusaale, gudaha Ireland waxaan bixinaa talaallada ka difaacaaya ilmaha cudurka meningococcal B iyo C. Caabuqyadaan ayaa keeni kara xanuunka meningitis iyo septicaemia. Talaaladaan ayaan qayb ka ahayn jadwalka talaalka ee wadamada qaar. Laakiin waa lagu talinayaa in la baxsho gudaha Ireland si looga difaaco ilmaha caabuqyadaan xunxun.

**Cunugaygu wuxuu talaaladiisa kusoo qaatay wadan kale. Muxuu ku falayaa talaallada kale hadda oo uu ku nool yahay Ireland?**

Maadaama ilmahaagu hadda ku nool yahay Ireland, waa inuu raacaa jadwalka talaalka Ireland. Talaallada lagu talinaayo gudaha Ireland ayaa ilmaha difaacaayaa cudurada ku badan Ireland ama kuwa abuuri kara cawaaqibyada xun.

Ilmahaagu waa inuu qaataa talaallada "kabista ah" kuwaasoo lagu talinaayo gudaha Ireland. Uma baahna inuu ku cesho talaallada uu horey ugu soo qaatay wadan kale.

**Waa maxay cudurada talaaladaan dheeriga ah ay ka difaacayaan cunugaaga?**

**Talaalka Afka laga qaato ee Rotavirus**

Rotavirus waa caabuq fayraska ka dhasha kaasoo keena shuban iyo matag ku dhaca ilmaha dhashay iyo carruurta yaryar. Inta badan carruurta ayaa soo bogsooda ayagoo guriga jooga laakiin qaar ayaa u baahan in isbitaal la seexsho. Ku dhawaad 880 carruur ah oo ka yar da'da 5 sano ayaa la dhigay isbitaalka ayagoo qaba caabuqa rotavirus sanad kasta gudaha Ireland kahor intaan la bilaabin talaalka rotavirus. Tiradaan ayaa si wayn hoos ugu dhacday ilaa markii la bilaabay talaalka rotavirus.

Talaalka Rotavirus waxaa keliya la siin karaa ilmaha dhashay ee ka yar 8 bilood.

**Talaalka Meningococcal B (MenB)**

Talaalka MenB ayaa ka difaacaaya ilmahaaga cudurka meningococcal B. Kani waa caabuq bakteeriyo ah oo daran kaasoo keeni kara meningitis (dhaawac gaara xidididada ku xeeran maskaxda) iyo septicaemia (sunta dhiiga). Meningococcal B ayaa keena inta badan caabuqyada iyo dhimashada ka dhalata meningitis ka ku dhaca ilmaha ku nool Ireland. Talaalka MenB lama siinyo ilmaha ka wayn 2 sano jir.

**Talaalka Meningococcal C (MenC)**

Talaalka MenC ayaa ka difaacaaya ilmahaaga cudurka meningococcal C. Kani sidoo kale waa caabuq bakteeriyo ah oo daran kaasoo keeni kara meningitis (dhaawac gaara xidididada ku xeeran maskaxda) iyo septicaemia (sunta dhiiga). Waxaa sidoo kale jiri kara talaallo kale oo lagu talinaayo in cunugaaga la siiyo. Dhakhtarkaaga ama kalkaalisada ayaa kula talin doona.

**Talaalka Pneumococcal (PCV13)**

Talaalka PCV13 wuxuu ka hortagaa cudurka ka dhasha bakteeriyada pneumococcus.

Bakteeriyadaan ayaa keeni kara cudurada sida meningitis (dhaawac gaara xididada ku xeeran maskaxda), burukiitada (caabuqa sanbabada) iyo septicaemia (sunta dhiiga).

**Waa maxay dhibaatooyinka ka dhalan kara talaalladaan?**

Ciladaha ka dhalan kara talaallada kadib waxay jirayaan dhawr maalmood keliya

**Kadib talaalka menB** cunugaaga ayaa yeelan kara qandho (heerkul sareeya) ama dareemi kara xanuun, gaduudashada iyo bararka meesha cirbada looga dhuftay.

**Kadib talaalka menC** cunugaaga ayaa dareemi kara xanuun, gaduudashada iyo bararka meesha cirbada looga dhuftay ama lahaan karo qandho ama cuncun.

**Kadib Rotavirus** cunugaaga ayaa lahaan kara shuban kooban. Marar aad dhif u ah wuxuu dareemi karaa calool xanuun ama waxaa kasoo bixi kara faruurac.

**Xagee ayaan talaalka uga helayaa cunugayga?**

Wadanka Ireland dhakhaatiirta qoyska (GPs) ama Barnaamijka Kabista Talaalka ee Soo galootiga ayaa siiya talaal carruurta qaxootiyada iyo carruurta dadka magangalyo doonka ah. Kalkaaliso taqasus leh ayaa caadiyan siisa ilmaha talaallada, ayadoo ka amar qaadanaysa dhakhtarka guud (GP). Waxaa sidoo kale jiri kara xarumo kale oo caafimaad oo ay diyaarsheen adeegga caafimaadka si ilmaha ay u siiyaan talaallada ay u baahan yihiin.

**Sidee baan ballan uga qabsan karaa GP ga?**

Waxaad u baahan doontaa inaad balan ka qabsato GP ga, si aad u hesho xog ku saabsan sida aad ku helayso GP ka fiiri xog barta https://www2.hse.ie/services/find-a-gp/.

Haddii aadan haysan GP, Kooxda Talaalka Kabista ah ee maxaliga ah ayaa kula soo xiriiraaya.

**Maxaa ka dhacaaya booqashada talaalka?**

Kahor intaan la bixin talaallada, xubin kamid ah Kooxda Kabista Talaalka ee Maxaliga ah, GP ga ama Kalkaaliso taqasus leh ayaa kaala hadli doona talaallada ilmahaagu u baahan yahay kaalana hadli doona talaal kasta. Kadib marka aad qaadato talaallada xubin kamid ah Kooxda Talaalka Kabista ah, GP ga ama Kalkaaliso Tasus leh ayaa ku siinaysa dukumiintiga 'Baasaboorka Talaalka' kaasoo faahfaahinaaya talaallada la siiyay ilmahaaga. Aad ayay muhiim u tahay inaad meel fiican dhigato Baasaboorkaaga Talaalka maadaama uu yahay diiwaanka taariikhda talaalka cunugaaga. Waa muhiim inaad diiwaankaan soo qaadato mar kasta aad oo aad booqashooyin kale u timaado.

**Ma qarash ayaa iiga baxaaya talaalka?**

Maya. Talaalku waa lacag la'aan Ireland.

**Ma jiraan wax kamid ah talaallada lagu talinaayo in carruurta waawayn la siiyo?**

Marka carruurtu ay ku jiraan dugsiga waxaa lagu talinayaa inay qaataan talaallada

Saqiirada Dugsiga Hoose (da'da 5):

MMR iyo kuurada xoojinta ah ee Gawracatada, Teetanada, Jix-dheerta (xiiqda) iyo Booliyada kuwaasoo lagu baxsho dugsiga.

Sanadka koobaad ee dugsiga sare (da'da 12):

Talaallada HPV, MenACWY (meningococcal ACWY) iyo kuurooyinka xoojinta ah ee Gawracatada, Teetanada iyo Jix-dheerta (Xiiqda) ayaa lagu baxshaa dugsiga.

**Ma jiraan wax kamid ah talaallada lagu talinaayo in Dadka qaangaarka ah la siiyo?**

Haa. Dadka qaangaarka ah ee aan wali qaadan qaar kamid ah talaallada ayaa lagu talinayaa inay qaataan. Tusaale talaalka MMR kaasoo ka hortaga jadeecada qaamoow-qashiirka iyo rubella ayaa lagu talinayaa inay qaataan dadka waawayn ee aan marna qaadan talaalkaan. La hadal xubin kamid ah Kooxda Talaalka Kabista ah, dhakhtarka qoyskaaga (GP) ama kalkaaliso.

**Waxaan su'aalo ka qabaa talaalka, qofkee ayaan kala hadli karaa?**

La hadal xubin kamid ah Kooxda Talaalka Kabista ah, GP gaaga ama kalkaaliso Taqasus leh. Haddii xarumaha kale ee caafimaadka ay diyaarshaan adeegga caafimaadku si ay talaallo u siiyaan carruurta, waxaad la hadli kartaa dhakhtarka ama kalkaalisada joogtada xarumahaan caafimaadka sidoo kale.

**Xagee ayaan ka helaysaa xog dheeri ah?**

Booqo www.immunisation.ie